# Wax yar oo kooban kuna sabsan jadwalka gaadiidka

**ISBEDELKA JADWALKA GAADIIDKA EE HAL MAALIN OO KALIYA:**

- Waa inaad isbedelka dhacay ayadoo qoraala ku soo gudbisaa ugu dambays ka hor kl. 12 maalmaha caadiga ah, adigoo isticmaalaaya bogga internetka: http://www.aarhus.dk/ændring-1 ama tlf. 89 40 60 10. (brug tastemenu)
- isbedelka ku dhaca wixii maalmo badan waxaa loo aqoonsanaayaa isbedel abid ah. Markaasna waa inaad raacdaa dariiqa laguugula talinaayo ee ku saabsan isbelka abidka ah ee jadwalka gaadiidka.

**ISBELKA ABIDKA AH EE JADWALKA GAADIIDKA:**

- isbelka abidka ah ee jadwalka gaadiidka wuxuu ka bilaabanaayaa 2bo maalin ama maalmo badan. Tusaale ahaan waxay noqon kartaa isbedel rasmi ah ood ku samayso waqtiga cunuga lagaa qaadaayo.
- Isbedeladda noocana ee abidkaa waxaad haysataa muddo shan maalin shaqo ah, ka hor inta isbedelku uusan dhaqan gelin(maalinta isbedelka aad samaysay nasoo gaaro laguma tirinaayo) Isbedelka abidka ah waxaa laga diiwaan gelinaayaa bogga internetka ee halkaan ku xusan: http://www.aarhus.dk/varig

**WAQTIGA FASAXA:**

- Fasaxyada (Dayrta, fasaxa yuuliga, fasaxa xagaaga iwm.) Waa in loo soo gudbiyaa xafiiska baabuurta ee la xidhiidha qorshaha fasaxa ee casriga ah ee aad ka heleyso boggeena. Waxaadna mudooyinka fasaxa la gelaayo kala socon kartaa bogga internetka ee xarunta/iskoolka cunugu dhigto.
- Fasaxa hadii wax laga bedelaayo waa inaad ka diiwaan gelisaa bogga internetka: http://www.aarhus.dk/ferie
- Isticmaalka gaadiidka waqtiyada fasaxa waxaa loo baahan yahay haysashada ogolaansho gaara, kaasoo daboolaaya waqtiga fasaxa.

**BAAJINTA ISTICMAALKA GAADIIDKA:**

- Baajinta gaadiidka waa in lasoo wargeliyaa ugu yaraan maalin ka hor intaan la gaarin kl. 12
- Baajinta gaadiidka iyadoo la isticmaalaayo telefon la waco xafiiska gaadiidka waa kanaa tlf.: 89 40 60 10. (Brug tastemenu) ama isticmaal emailkaan mba-befordring@aarhus.dk

**DEG DEG KU IMAADA ISBEDELKA ISTICMAALKA GAADIIDKA:**

- Isbedel deg dega oo yimaada, sida in jirro timaado, waa inaad wacdaa xafiiska gaadiidka lambarkooduna yahay 89 40 60 10. (Brug tastemenu). Xafiiska gaadiidka asagaa markaas kuu dalbaaya qaadid/guri gayn deg dega
- Waxaanse ku talin lahayn, in waalidka ilaa inta ay suurtagal tahay ay ayagu ilmahooda jirran qaataan, sababtoo ah guri uqaadista deg degaa waxay keeni kartaa sugitaan dheer.

AARHUS KOMMUNE

**ISBEDELKA SABABAAYA INLA SAMEEYO OGOLAANSHIHII OO LA BEDELO AMA MID CUSUB LA SAMEEYO**

- Hadii lacalla la kordhiyo waqtiyadii gaadiidka ama lagu soo kordhiyo adreesyo cusub, markaas waa in sooshaalkaagu usoo diraa ogolaansho cusub xafiiska gaadiidka.
- Waxaad haysataa muddo shan maalin-shaqo oo xafiiska gaadiidka lagu soo gaarsiiyo ogolaanshaha ka hor  intaan isbedelka waqtiga gaadiidka uusan dhaqan gelin.

**MAXAAN SAMEEYAA, HADII BAABUURKA IMAAN WAAYO:**

Waxaad wacaysaa xafiiska gaadiidka lambarkooduna waa 89 40 60 10 (brug tastemenu). Markaad tlf.ka wacdo kasii dooro menuga lam. 1(tastes 1). Markaas kadib kasii dooro nooca gaadiidka idin qaada. Hadii waqtigu yahay mid ka baxsan waqtiga xafiiska gaadiidku furan yahay ahna inta udhexaysa kl. 06 – 08 iyo kl. 16 – 22, Waxaa laguu wareejinaa talefonka heeganka ah (vagttelefon).

**MAXAAN SAMEENAAYAA, HADII AAN DACWO QABO:**

Waxaad dacwadaada usoo diri kartaa xafiiska gaadiidka bogooda internetkaan:
https://aarhus.dk/borger/personlig-hjaelp-og-stoette/koerselstilbud/koerselskontoret/klage-over-koersel/

**FARIINTA SMS-SERVICE:**

- Xafiiska gaadiidka wuxuu leeyahay fariin SMS-service. Fariintaan SMS’ka adigaa laguu soo diraayaa wixii ka dambeeya kl. 18 fariintaasoo ah goorta la filaayo in berri cunugaaga lasoo dooni doono. Waana inaad laabta ku sii haysaa, in baabuurku xoogaa waqtiga kasoo yara daahi karo sabab jidka iyo taraafiiga darteed ah.
- Ma iska diiwaan gelinee inlaguu soo diro fariinta SMS-service ama mobilkaaga ma bedeshay, hadaba lasoo xiriir telefonka xafiiska gaadiidka 89 40 60 10. (Brug tastemenu)

**SHARUUDAHA LAGA RABO DARAWALKA IYO KAALIYAHIISABA**

*Sharuuda tacliimeed ee shufeerka*

- Shufeerka shaqadiisa ugu wayni waa inuu ciyaalka si nabadgelyo ah baabuurka ugu wado, hadii loo baahdana kaalmo gargaarka degdegaa bixin karo hadii baahidaas timaado, isla markaasna waco tlf. heeganka ah 112. Intaas ka dibna la xiriiro qaybaha kaleeto ee arintaan khusayso.
- Shufeerka waxaa laga rabaa inoow yaqaano sida loogu shaqeeyo wixii aalado iyo batoono ah ee baabuurka uu leeyahay, yaqaanana wixii sharciya kuna saabsan qaadista dadka curyaanka ah iwm.
- Shufeerada dadka curyaanka ku qaada kursiga curyaanka, waa inay soo dhamaysteen tacliinta ah qaadista rakaabka jismi ahaan curyaanka u ah ”Befordring af fysisk handicappede passagerer”.
- Waxaa laga yaabaa inloo baahdo uyeelasho aqoon gaara sida  xoogaa hadalka dhagoolada ah ”tegn til tale”  ama barashada/ogaal uyeelashada jirooyinka qaarkood sida suuxdinta oo kale (for eksempel epilepsi). Shufeerada u shaqeeya iskoolada Langagerskolen og Stensagerskolen waxaa iskoolku siiyay aqoon gaarka ooy iskoolka ku qaateen. Shufeerada qaada dadka maandoowga, waxay tacliinta jirrada maandowga ka qaateen xarunta Demenscentrum.
- Shufeerada oo dhan waxay ka siman yihiin oo ay wada qaateen tacliinta gargaarka degdega ah oo ay aqoonsan tahay hay’adda Dansk Førstehjælpsråd muddo ku siman 5tii sano ee ugu dambeeysay. Koorsada gargaarka degdegaa waa 8 saacadood